

Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiiladda JSL



Warbixinta

Wax-qabadkii Golaha Wakiiladda

Sanadkii 2017

January 2017

Ku: - Shirgudoonka iyo Mudanayaasha Golaha Wakiiladda JSL.

Ujeedo: - Warbixinta wax-qabadka Golaha Wakiiladda ee sanadka 2017ka.

Mudanayaal

Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa waxqabadka Golaha Wakiiladda Sanadkii dhamaadey ee 2017kii oo ka kooban Mashaariicdii Sharci ee Goluhu Ansixiyay, kuwa dhaqan-galey, Masuuliyiintii la ansixiyay, Go'aanadii Goluhu gaadhey, Wixii Gudiyaddu qabteen iyo waxyaabo kale si aad u xusuusataan uguna qiyaas-qaadatan qorsheynta hawlaha Golaha ee sanadka 2018ka una dardar-galino.

Sanadka 2017kii Golaha Wakiiladu wuxuu yeeshay saddex kal-fadhi iyadoo fadhidiisu isugayn ahaayeen 60 fadhi, sidaa darteed Warbixintani waxay xambaarsan tahey wax-qabadkii sanadkaas oo ka kooban Mashaariicda Sharci ee Goluhu ka doodey, kuwa uu ansixiyay, Masuuliyiinta Qaran ee uu Ansixiyay iyo kuwa Golweynaha iyo Gudiyaduba la kulmeen, Go'aamadii Goluhu gaadhey oo taariikheysan, Is-casilaadii Gudoomiyihii Golaha iyo Doorashadii Gudoomiyaha iyo Guud ahaan waxyaabihii sanadka u soo kordhay Golaha Wakiiladda, sidoo kale Iscasilaadii Gudoomiyaha Golaha iyo isbadalkii ku yimi Shir-gudoonka Golaha oo doortay Gudoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen.

Warbixintani waxay xuseysa hawl kasta iyo dhacdo kasta iyadoo taariikheysan maalinta ay dhacdey iyo wixii ka soo baxay.

Kal-fadhiyadii Golaha ee 2017ka:-

No.	Kal-fadhiga	Taariikhda
1.	Kal-fadhigii 33 ^{aad}	06/03/2017 ilaa 06/05/2017
2.	Kal-fadhigii 34 ^{aad}	01/07/2017 ilaa 27/08/2017
3.	Kal-fadhigii 35 ^{aad}	25/11/2017 ilaa 01/21/2018

Fadhiyada ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen:-

1.	Fadhiyada Goleweynuhu	60 Fadhi
2.	Fadhiyada Gudidda Joogta	19 Kulan
3.	Fadhiyada Gudiyada kale	29 Kulan
	Isugeyn	108 Fadhi

Warbixinada Golaha laga hor akhriyay:-

Taariikhda	Warbixinta	cid akhridey
13/03/2017	Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 31 ^{aad}	Xoghayaha Guud Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle
13/03/2017	Warbixintii Gudidda Joogtada iyo Anshaxa	Md. Ibraahim Mahdi
02/04/2017	Warbixinta Wasaarada Macdanta iyo Tamarta ee Xeerarka Sahminta Shidaalka, Xeerka Dakhliga Shidaalka iyo Xeerka Macdanta iyo Tamarta	Md. Xuseen Cabdi ducaale Wasiirka Wasaarada Macdanta iy Tamarta
09/04/2017	Warbixinta Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka	Md. Naasir X. Cali Shire Gudoomiye Gudida
15/04/2017	Warbixinta Xeerka Shirkadaha	Md. Dr Cumar Shucayb Maxamed Wasiirka W. Ganacsiga iyo Maalgashiga

Xeerarka Madaxweynaha u gudbey si uu dhaqan-galiyo:-

No	Xeerka	Taariikhda	Loo Gudbiyay
1.	Wax ka badalka iyo Kabista Xeerka Dorashoyinka Madax/tooyada iyo Golayaasha Deegaanka Lifaafa 6 ^{aad}	16/01/2017	Maxweynaha
2.	Xisaab Xidhada 2014 iyo 2015kii.	23/07/2017	Maxweynaha
3.	Wax ka badalka Xeerka Biyaha Qaranka	29/07/2017	Maxweynaha
4.	Xeerka Booliiska	04/12/2017	Maxweynaha
5.	Xeerka Hay'adda Duulista Hawada	04/12/2017	Maxweynaha
6.	Xeerka Xabsiyada	04/12/2017	Maxweynaha

Xeerarka Goluhu Ansixiyay ee Guurtida u Gudbay:-

No	Xeerka	Taariikhda
1.	Wax ka badalka Xeerka Biyaha Qaranka	29/07/2017
2.	Xeerka Shirkadaha	09/12/2017
3.	Xeerka Maaraynta Deegaanka	17/12/2017

Masuuliyiinta Qaran ee Golaha hor-yimi:-

No	Masuulka	Warbixinta	Taariikhda
1.	Md. Xuseen Cabdi Ducaale Wasiirka Macdanta iyo Tamarta	Warbixinta Xeerarka Shidaalka	02/04/2017

2.	Md. Cumar Shucayb Maxamed Wasiirka Ganacsiga iyo Maalgashiga	Warbixin iyo Su'aalo ku saabsan Xeerka Shirkadaha	15/04/2017
3.	Md. Xuseen Cabdi Ducaale Wasiirka Macdanta iyo Tamarta	Su'aalo Xeerarka Shidaalka	16/04/2017
4.	Hant-dhowraha Guud ee Qaranka	Xisaab Xidhkii 2016kii iyo Dhinaashihii Miisaaniyadii 2017ka	25/12/2017

Ansixinta Masuuliyiinta Qaran:-

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Axmed Xaashi Cabdi	Wasiir Ku Xigeenka Madaxtooyada	13/03/2017
2.	Axmed Maxamuud Nuur	Wasiir Ku Xigeenka Ganacsiga	13/03/2017
3.	Guleed Cabdi Xassan	Wasiir Ku-Xigeenka Warfaafinta	13/03/2017
4.	Mustafe Faarax Abraar	Wasiiru Dawlaha Gashandhiga	13/03/2017
5.	Khadar Axmed Diiriye	Wasiiru Dawlaha W. Cadalada	13/03/2017
6.	Maxamed Cabdi Ibrahim	Gudoomiyaha Baanka Dhexe	13/03/2017
7.	Khadar X. Yusuf C/Lahi	Wasiirka Dhaqanka Iyo Dalxiska	13/03/2017
8.	Maxamud Sh. C/Lahi	Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta	13/03/2017
9.	Liban Yusuf Cisman	Wasiir Ku Xigenka Hawlaha Guud	13/03/2017
10.	Mustafe Maxamud Cali	Wasiir Ku Xigenka Xidhiidhka/G	13/03/2017
11.	Maxamed Sh. Cumar Xasan	W/ Ku Xigeenka Dhaqanka	13/03/2017
12.	Md. Cabdirisaaq Waabari Rooble	Wasiirka Ciyaaraha iyo dhalinyarada JSI	01/04/2017
13.	Md. Maxamed Cabdilaahi Obsiye	Wasiirka Shaqada iyo Arimaha Bulshada	01/04/2017
14.	Md. Xuseen Cabdi Boos	Wasiirka wasaarada Biyaha	01/04/2017
15.	Md. Maxamed Ibraahim Aadan	Wasiirka Wasaarada Qorshaynta Qaranka	01/04/2017
16.	Md. Axmed Xuseen Rooble	Wasiir ku-xigeenka Waxbarashada	01/04/2017

Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah:-

A. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan:-

No	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada
2.	Xeerka Dakhliga Shidaalka	Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada
3.	Xeerka Sahminta iyo Soo saarista Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kh.Dabiiciga
4.	Xeerka Macdanta	Gudidda Deegaanka iyo Kh.Dabiiciga
5.	Xeerka Tamarta iyo Korontada	Gudidda Deegaanka iyo Kh.Dabiiciga
6.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

7.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha
8.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Golaha Wakiiladda	Gudidda Arrimaha Gudaha
9.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha
10.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka
11.	Xeerka Gudidda Qandaraasyada	Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida
12.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada
13.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
14.	Xeerka Ilaalada Xeebaha	Gudidda Arrimaha Gudaha

B. Xeerarka Golaha Weynaha Horyaal:-

15.	Xeerka Maamulka Qashinka (Waste Management Bill)	Akhriskii labad
16.	Xeerka Maydhista Lacagta	Akhriski labaad
17.	Xeerka Gudidda Dib U-habeynta Shuruucda	(Madaxtoyada ka soo noqdey)

Go'aanada Goluhu Gaadhey:-

Go'aanadii 2017kii

No.	Go'aanka	Tariikhda go'aanka	U gudbay
1.	Go'aanka Ansixinta Ajandaha 33aad ee Golaha Wakiiladda	11/03/2017	Gole waynaha
2.	Go'aanka Ansixinta Tageerida wada hadalada Jamhuuriyada Somaliland iyo khaatumo	18/03/2017	Madaxweynaha
3.	Go'aanka Ansixinta Wasiir ku xigeenka wasaarada Warfaafinta iyo wacyigalinta Md. Guleed Cabdi Xassan	14/03/2017	Madaxweynaha
4.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada ganacsiga iyo maalgashiga caalamiga ah Md. Axmed Maxamuud Nuur	14/03/2017	Madaxweynaha
5.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska Md. Khadar X. Yuusuf Cabdilaahi	14/03/2017	Madaxweynaha
6.	Go'aanka Wasiirka Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta Md. Maxamuud Sh. Cabdilaahi Cige	14/03/2017	Madaxweynaha
7.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Hawlaha Guud, guryaynta iyo Gaadiidka Md. Liibaan yuusuf Cismaan	14/03/2017	Madaxweynaha
8.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska Md. Maxamed Sh. Cumar Xassan	14/03/2017	Madaxweynaha
9.	Go'aanka Ansixinta wasiiru dawlaha Wasaarada Cadaalada iyo Arimaha Garsoorka Md. Khadar Axmed Diiriye	14/03/2017	Madaxweynaha

10.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Madaxtooyada Md. Axmed Xaashi Cabdi	14/03/2017	Madaxweynaha
11.	Go'aanka Gudoomiyaha Baanka Dhexe Md. Maxamed Cabdi Ibraahim (Dhoobaale)	14/03/2017	Madaxweynaha
12.	Go'aanka Ansixinta Wasiiru Dawlaha Wasaarada Gashaandhiga Md. Mustafe Faarax Abraar	14/03/2017	Madaxweynaha
13.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Xidhiidhka Golayaasha Cilmi Baadhista iyo Tegnoolajiyada Md. Mustafe Maxamuud Cali Bile	14/03/2017	Madaxweynaha
14.	Go'aanka Ansixinta wasiir ku xigeenka wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	01/04/2017	Madaxweynaha
15.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka Wasaarada Biyaha	01/04/2017	
16.	Go'aanka Ansixinta wasiirka Wasaarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada	01/04/2017	Madaxweynaha
17.	Go'aanka Ansixinta Wasiirka wasaarada Ciyaaraha iyo dhalin yarada	01/04/2017	Madaxweynaha
18.	Go'aanka Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Biyaha Qaranka	13/08/2017	Madaxweynaha
19.	Go'aanka Ansixinta Kal-fadhiga 35aad ee Golaha Wakiiladda	28/11/2017	Gole weynaha
20.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Xabsiyada (X.l.r. 65/2014)	03/12/2017	Madaxweynaha
21.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adad Duulista madaniga ah (X. l.r. 70/2015)	03/12/2017	Madaxweynaha
22.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Booliska (X.Lr. 63/2013)	03/12/2017	Madaxweynaha
23.	Go'aanka Ansixinta Xeerka Shirkadaha (X.Lr.80/2017)	20/12/2017	Golaha Guurtida
24.	Go'aanka ansixinta Xeerka Maaraynta Deegaanka (X. Lr. 79/2017).	20/12/2017	Golaha Guurtida

Is-casilaadii Gudoomiyaha iyo Doorashadii Gudoomiyaha iyo Ku-xigeenka 1^{aad}

- **Is-casilaadii Gudoomiyihii Golaha:-**

02 August 2017 ayuu Gudoomiyihii Golaha Wakiiladda Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro) uu si rasmi isaga casilay Xilkii Gudoomiyenimo ee uu Golaha Wakiiladda u hayay tan (2005) iyo markii la soo doortay Mudanayaasha Golaha Wakiiladda ilaa August 2017 oo ah 12 sano, Fadhi aan caadi ahayn oo uu Gudoomiyuhu isugu yeedhay Golaha Wakiiladda ayuu ka jeediyay khudbad dhinacyo badan taabanaysay ka dib markii uu Golaha kaga hor dhawaaqay is-casilaadiisa isla markaana Mudanayaasha Goluhu aqlabiyad aan loo kala hadhin kaga aqbaleen.

Khudbadii uu Gudoomiyuhu ka jeediyay fadhigaas waxay ka koobnayd xaaladii iyo sidii uu ahaa Golaha Wakiiladu markii ay xilka kala wareegeen Golihii ka horeeyay,

waxyaabihii ay ka dhaxleen, waxyaabihii u qabsoomay mudadaas 12 sano ahayd iyo horumarkii uu gaadhsiiyay Golaha, Mudanayaashii ka geeriyooday Golaha mudadaas, khilaafyadii iyo waayihii ay isla soo mareen Xukuumadihii dalka ka soo talinayay laba iyo tobankaas sanadood iyo sidii Wanaagsayd ee Mudanayaasha Goluhu ula soo shaqeeyeen.

- **Doorashadii Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku-xigeenka 1^{aad}:-**

Ka dib markii Gudoomiyihii hore ee Golaha Wakiiladda JSL mudane Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (CIRRO) uu 02 August 2017 iska casilay xilka gudoomiyanimoo ee golaha ayaa waxa bilaabmay tartan loogu jiro xilkaas golahaas ka banaanaaday. Waxa isna xilkii gudoomiye kuxigeenka 1^{aad} ee golaha Wakiiladda iska casilay Baashe Maxamed Faarax oo isu taagay xilka Gudoomiyaha Golaha oo ay ku wada tartameen Xildhibaan Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle. Fadhigii golaha Wakiiladda ee maalintii Axada 06 August 2017 ka dhacay xarunta golahaas cod gacan taag ah loogu qaaday kabada musharax eek ala ah:-

- **Md. Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle *Rabi Naxariistii jano ha ka waraabiye***
- **Md. Baashe Maxamed Faarax**



Labada musharax ayaa waxay mudanayaasha ka hor jeediyeen khudbad mid waliba mudanayaasha kaga codsaday inay isaga u codeeyaan isla markaana ay ku soo bandhigeen sida ay u doonayaan inay golaha u maamulaan.

Fadhiga oo uu shirgudoominayay Gudoomiye kuxigeenka 2aad ee golaha mudane Dr. Cali Yuusuf Ahmed oo ay ka soo xaadireen 78 xildhibaan ayaa waxa uu u qaaday cod isagoo markii codkaasi dhamaadayna ku dhawaaqay natiijada, waxaanay u dhacday sidan.

No	Magaca musharaxa	Codka uu helay
1	Cabdiraxmaan Maxamed Talyanle	38 cod
2	Baashe Maxamed Faarax	39 cod
3	Gudoomiyuhuna ma codayn	1
	Codka guud	78

Fadhigana waxa lagu soo gebagebeeyey is gacan qaad iyo isu hambalyayn gudoomiyihii fadhiga lagu doortay iyo musharixii laga guulaystayba ay si lab furan ah isugu hambalyeeyeen.

Doorashadii Gudoomiye ku-xigeenka 1aad **27/08/2017** Golaha wakiilladu waxa uu yeeshay fadhi lagu dooranaayay gudoomiye Ku xigeenka koowaad ee Golaha, fadhigaas waxa shirgudoominayay Gud. Baashe Maxamed Faarax. Waxaana ka soo xaadiray 71 xildhibaan. jagadan Gudoomiye ku xigeenka koowaad ee golaha wakiillada oo uu baneeyay gudoomiye baashe waxa u tartamay 10 Xildhibaan ku waasoo markii dabne 7 ba ka mid ahi ka tanaasuleen waxaana isugu soo hadhay 3 xildhibaan oo kala: Md. Axmed Yaasiin sh. Cali Ayaanle. M.d Axmed Cabdi Kaahin iyo Md. Xasan Muuse Hufane. Gudoomiyaha Golaha Md Baashe ayaa ku dhawaaqay magacayada sadexda mudane ee u tartamaaya jagada gudoomiye ku xigeenka kowaad ee golaha ka dibna waxa lagudo galay codayntii waxayna u dhacay sidan:-

Fadhiga waxa ka soo xaadiray 71 xildhibaan Md. Axmed Yaasiin sh Cali Ayaanle Waxa uu codeeyay 50 cod Md. Xasan Muuse Hufane waxa uu codeeyay 16 cod Md. Axmed Cabdi kaahin Waxa uu codeeyay 1 Cod Sidaana waxa ugu guulaystay jagadii Gudoomiye ku xigeenka koowaad ee Golaha wakiillada Jsl mudane Axmed yaasiin Sh. ayaale oo helay cod aqlabiyada. Intaa ka dib Gudoomiye ku xigeenka Koowaad ee la doortay Md. Axmed yaasiin Sh, Cali ayaanle ayaa khudbad kooban oo uu jeediyay golaha waxaanuu sheegay in ku hogaamin doono Golaha iyo xildhibaanadaba Cadaalad, dhexdhexaadnimo iyo wadatashi.

Fadhiyadii Wada-jirka ee Ansixinta Heshiiskii Saldhiga Militari ee M. Berbera:-

06/03/2017, Waxay Xukuumadu labada Gole Fadhi Wada-jir ah ugu soo gudbisay heshiis ay la gashay Dawlada Imaaraadka uu ku saabsan in Saldhig Military laga siiyo Magaalada Berbera Dawlada Imaaraadka Carabta, Fadhigaas oo Madaxweyne Md. Axmed Maxamed Siilaanyo iyo Koox Wasiir la socdaan uu Golaha ka jeediyay Khudbad sanadeedka Madaxweynaha ee sanadka 2017kii, wuxuuna khudbadaas ku soo qaatay oo uu labada Gole ku wargaliyay inay heshiis Saldhig Military laga siinayo Berbera la galeen Dawlada Imaaraadka Carabta, heshiiskaas oo uu sheegay inay Wasiiradu Golaha faah-faahin dheeraada ka siinayaan.

Ka dib, markuu uu khudbadiisa dhameeyay Madaxweynuhu wuxuu ka baxay Fadhiga, isla markaas Gudoomiyaha Golaha Guurtida Md. Saleebaan Maxamuud Adam oo fadhiga Gudoominayay, wuxuu ku soo dhoweeyay Wasiirada heshiiska Golaha u faah-faahinayay, waxaana halkaas xogta iyo ujeeddada heshiiskaas Golaha ka hor akhriyay Md. Faarax Aadan Haybe Wasiirka Duulista Hawada.

Intaas ka dib, Xildhibaanada qaar ka mid ah ayaa Golaha buuq ka bilaabay, wuxuuna Gudoomiyuhu amray in fadhiga laga saaro ka dib markii u hogaansami waayeen, sidoo kale Xildhibaanada qaar ka mid ah ayaa soo jeediyay in heshiiska isla fadhigaas loo codeeyo, waxaana la isla qaatay soo jeedinta in fadhigaas loogu codeeyo heshiiska.

Xildhibaanada labada Gole ee fadhiga ka soo xaadiray oo tiradoodu dhamayd 147 Mudane waxaa cod aqlabiyad heshiiskaas ku ogolaaday 144 Mudane, waxa diiday 2 Mudane waxayna labada Gole Baarlamaan ee Somaliland sidaas ku meel-mariyeen oo ku ogolaadeen Heshiiska Dawlada Somaliland Saldhiga Military kaga siisay Dawlada Imaaraadka Carabta Magaalada Berbera.

Waxqabadaka Gudiyada Golaha Sanadkii 2017kii:-

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

02/02/2017 waxay Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Duulista Hawada Md. Farxaan Aadan Haybe, iyadoo Gudiddu Wasiirka ka waraysatay Wasaaradiisa iyo shaqada uu qaranka u hayo sidoo kale su'aalo ka waydiisay.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Wasiir ku-xigeenka Madaxtooyada **Md. Axmed Xaashi Cabdi** iyo Wasiir ku-xigeenka Xidhiidhka Golayaasha **Md. Mustafe Maxamud Cali** in Xilalk Madaxweynuhu u magacaabay loo ansixiyo.

Sidoo kale Gudiddu waxay kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Caafimaadka

Md. Saleebaan Ciise Xaglatoosiye oo Gudiddu wax ka waydiisay Xaalada Caafimaadka dalka iyo wax u qorsheysan Wasaarada.

Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaaluhu waxay ka soo shaqeysay Xeerka Shirkadaha oo ay gacanta ku haysay isla markaana intii lagu jirey Kal-fadhigii 33^{aad} ayay Gudiddu Xeerkaas Golaha u soo gudbisay isagoo Gudoomiyaha Gudiddaasi Md. Cumar Axmed Saleebaan uu Golaha ka hor akhriyay Warbixintii Gudiddu waxay ka soo qabatey Xeerkaas Shirkadaha.

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay si xilka Madaxweynuhu u igmaday loogu ansixiyo Masuuliyiinta kala ah:-

1. Gudoomiyaha Bangiga Dhexe **Md. Maxamuud Sh. Cabdilaahi**
2. Wasiir Ku-xigeenka Ganacsiga **Md. Axmed Maxamed Nuur**

Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah:-

Guddiga Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga iyaga oo gudanaya waajibaadkooda shaqo waxay socdaal qaatey mudo 8 maalmood ah ku tageen **25 February ilaa 05 March 2017** Gobolada Awdal, Gabilay iyo Hawd, iyagoo u kuurgalaya xaalada guud ee abaaraha gaar ahaan deegaanada ay ku soo guureen dadkii abaarta xuni ku dhacday ee kasoo guuray beriga somalinad.

Ujeedada guud ee safarku wuxuu ahaa u kuurgalida iyo xog-ogaal u noqoshada xaalada guud ee abaaraha gobolada galbeed ee somaliland dadkii soo guuray iyo waliba xaalada dadkii lagu soo guuray, waxa kale oo ujeedada safarku darnayd sidii Guddida Deegaanka iyo khayraadku uu baaq ku aadan dhibta abaarta iyo dadku waxay u baahan yihiin ay ugu gudbin lahaayeen Goleweynaha, si baaq looga soo saaro dhibaataada abaarta iyo waliba dadkaasi waxay u baahan yihiin si aan looga caajisin caawinta iyo kaalmaynta dadka abaartu haleeshay.



Intii Gudiddu safarka ku jirtay waxay kulamo iyo kormeero ku soo mareen xarumo iyo deegaan ka tirsan Goboladaas, iyagoo intii ay ku sugnaayeen Gobolka Awdal Magaalo Madaxdiisa ay kulamo la yeeshen Badhasaabka Awdal iyo Gudidda Abaaraha ee Gobolkaas, sidoo kale waxay Gudiddu booqataey Deegaanada Qol-ujeed iyo Degmada Dilla, halka Gobolka Gabileyna ay tageen Magaalada Gabiley iyo Degmada Wajaale iyo Tuulooyinka Waxaro Waaris iyo Baliga Cas oo ka tirsan Degmadaas Wajaale.

Iyagoo Gudiddu intii ay safarka ku jireen u kuurgaleen Xaalaada Abaareeda ee Deegaanadaas iyo intay dhibaataadu le'egtahey, waxay Gudiddu Warbixin ay ka diyaarisey ku soo jeedisey tallooyinkan soo socda:-

- In Dawladu ku dhawaaqdaa xaalad dag-dag ah islamarkaana Miisaaniyada Qaranka bisha hadhay 30% ay ugu talo gashaa taakulaynta iyo gurmadka abaaraha
- In Dawladu gaadiidka iyo shidaalkaba ugu deeqdaa dadka abaaraysan
- In dib loogu noqdaa qaab-dhismeedka Guddida abaaraha oo la helaa Guddi ka kooban bariga iyo galbeedkaba, lana helaa kormeer iyo la xisaabtan.

Gudiddu waxay Golaha uga soo tallo-bixisay si xilka Madaxweynuhu u igmaday loogu ansixiyo Wasiir Biyaha Qaranka **Md. Xuseen Cabdi Boos.**

29 June ilaa 02 July 2017 Gudiddu Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicga waxay kormeer ku tageen Gobolada Tog-dheer iyo Saraar iyagoo soo u kuurgalayay raadkii abaaruhu kaga tageen Goboladaas iyo xaalada ay ku noolyihiin ku Barakacay abaarahaas ee Xooluhu kaga dhamaadeen, iyadoo Gudiddu booqatey xeryaha ku yaal Kiridh, Ceynaba iyo Duleedka Magaalada Burco oo la isugu geeyay dadkii abaarahaas ku soo barakacay oo boqolaal qoys gaadhaya isla markaana xaalad aad u adag ku nool iyadoo gudiddu kormeerkaas ka diyaarisey warbixin Golaha ka jeedin doonaan.

10 January 2018 Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka ee Golaha Wakiiladda JSL ayaa kulan Dood ah u Qabatay Qabyo Qoraalka Xeerka Maaraynta Qashiinka adkaha iyo Dareeraha oo golaha Mudo dheer hor yaalay.

Kulanka oo ay ka soo Qayb Galeen Mayarada Golayaasha Deegaanka Berbera, Hargeysa iyo Ceerigaabo, Wasaarada Deegaanka, Wasaarada Caafimaadka iyo Khuburo Dhinaca Deegaanka ah, ayaa soconayay Laba maalmood laguna qabtay Hallka shirarka ee Golaha Wakiiladda JSL. Kulankan wadatashiga ahaa ayaa waxa lagaga doodayay qodobada xeerku ka kooban yahay iyo hadday inuun ku jirto qodobo u baahan in kaabis iyo wax ka bedel lagu sameeyaa Xeerka Qashiinka adkaha iyo Dareeraha oo ka Mid ah Xeerar ay Gudidda Deegaanka iyo Khayraadku gacanta ku hayso isla Markana ah Xeer aad Muhiim ugu ah Dowlada hoose, Wasaarada Caafimadka iyo Wasaarada Deegaanka Sido kalena Xeerkan ayaa ah Mid ay Bulshada Somaliland aad U sugayso.

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudiddu waxay Golaha uga soo tallo-bixisay si xilalka Madaxweynuhu u igmaday loogu ansixiyo Masuuliyiinta kala ah:-

1. Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska **Md. Khadar X. Yusuf C/Lahi**
2. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada **Md. Maxamed Cabdilaahi Obsiye**
3. Wasiirka Dhalinyarada iyo Ciyaaraha **Md. Cabdirisaaq Waabari Rooble**
4. Wasiir ku-xigeenka dhaqanka iyo Dalxiisa **Md. Maxamed Sh. Cumar Xasan iyo**
5. Wasiir Ku xigeenka Warfaafinta **Md. Guuleed Cabdi Xuseen.**
6. Wasiir ku-xigeenka Waxbarashada **Md Axmed Xuseen Rooble**

Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

12-13/04/2017 Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay Kulan hawleed socday laba casho u qabatey Xisaab Xidhadii 2014 iyo 2015kii oo Golaha horyaaley gudidaasina gacanta ku haysay, labadan Xisaab xidhoodh ee Miisaaniyadihii sanadadaas kulankan lagu falan qaynayay waxa ka soo qaybgaley Hay'addaha Dawlada ee ay khusayso sida Hanti-dhowrka Guud, Wasaarada Maaliyada, Gudidda Qandaraasyada Qaranka, Xisaabiyaha Guud iyo Bulshada rayidka ah oo isugu jirey Ururada Bulshada, Ardayda Jaamacadaha iyo aqoonyahan kale.

Mudadii labada cisho ahayd ee uu socday kulan hawleedkaasi waxa laga jawaabayay su'aalo dhowr ah oo ay Gudiddu ka soo diyaarisay si ay hay'addahaas dawlada ee aan kor ku soo sheegnay uga jawaabaan, sidoo kale bulshada rayidka ayaa su'aalo kale oo barbar socda iyagu waydiinayay Hanti-dhowrka Guud iyo hay'adahaas kale si loo iftiimiyo meelaha mugdigu kaga jiro Xisaab xidhadaas, sidoo kale kulankani wuxuu bar bilow u yahey dib u habeynta iyo isbadalka lagu sameynayo laamaha Maaliyada ee dalka iyadoo kulankaas sidoo kale lagu casuumay Xafiiska Dib u habeynta Maaliyada iyo Xisaabaadka PFM Office oo soo bandhigay reformkaas iyo inuu qayb ka yahey kulankani oo ah in bulshada loo soo bandhigo sidii loo kharashgareeyay Miisaaniyadii Qaranka Dakhligii ku soo xerooday.

Waxa Guddida ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku Kulan la yeeshen Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta iyo shirkada Telesom, iyada oo u jadeedada kulankaasi ahaa sidii loo fulin lahaa xeerka isgaadhsiinta oo gundhigiisu ahaa sidii laysugu xidhi lahaa shirkadaha isgaadhsiinta, si dadweynaha ay ugu fududaato is la xidhiidhida maadaama oo ay jiraan Semi card-yo ay kala leeyihiin shirkada Telesom, iyo Shirkada Somtel, ilaa maanta aanay suurto gelin ka shaqaysiinta xeerka isgaadhsiinta xeer Lr 50/2011, Iyada oo aanay wali waxba ka fulin hawshaas. Waxa kale guddidu wali ku hawlan tahay sidii ay u qaban lahayd kulan afar geesood ah oo dhex-mara Guddida, Wasaarada

Isgaashiinta, shirkada isgaadhsiinta Telesom iyo Shirkadaa Somtel, iyada kulankaa looga goleeeyey sidii la isula qaadan lahaa xal-guud oo ay ku wada qancaan shiradaha isgaadhsiinta, isla markaana ka faa'iidaystaan shacabka Somaliland guud ahaan.

17/04/2017 Waxa Guddida ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku kulan la yeeshen Guddoomiyaha Banka dhexe ee Somaliland, si ay isula meel dhigaan xaalada sicir bararka ee ka taagan guud ahaan Somaliland iyo doorka uu banka dhexe uu ka qaadan karo hoose u dhigida Sicir bararka dalka aafeeyey, ugu dambayntiina waxay guddidu waydiisay su'aalo la xidhiidh shaqada iyo warbixintii Guddida siiyeen.

Ujeedadda kulanka Gudiddu la yeelatay Maamulka Bangiga Dhexe waxay ahayd:-

- In guddidu u kuurgasho xaalada sicir barar ee Wadanka ka jira.
- Halka ay marayso wareegtadii madaxweyne ee ahayd in ZAAD ito e-dahad laga saaro hawada wixii ka yar \$100.
- Warbixin ku saabsan xaaladaha sarifka lacagaha iyo wuxuu u fadhiisan la yahay ilaa imika.
- Soo jeedinta in la sameeyo xeer lagu maamulo lacag hawada ku jirta (Money electron).

Waxyaabihii Guddida uga soo baxay kulanka.

- Bank dhexe ilaa imika ka maqan tahay awoodiisee baan ahaaneed.
 - In ilaa imika maqan yahay sharci lagu maamulo lacag (Money electron).
 - In aan baanu awood buuxda ku lahayn maamulida lacagaha suuqa.
 - In ilaa imika aanu baanku u shaqayn si badax banana.
 - In ilaa imika baanka dhexe aan gacanta ku hayn lacagaha adage e dollor ka mid ka yahay. Waxay inaga caawin laheyd qofku inuu si fudud u garan karo tirada guud ee lacagta budgtetka ku jirta ee horumarin loogu talo-galey noocey doonaan ha noqdaane.
- In la yareeyo qulqulka wasiirada ee xafiiska wasiirka Maaliyadda iyagoo raba kala wareejin madax oo ah wareejinta Kharash madax ku jirey oo loo wareejiyo madax kale, waa in la yareeyaa tirada madaxyada la oggol yahay in la wareejiyo ama la xadidaa waqtiga kala wareejinta sida iyadoo laga dhigo lixda bilood ee u horreeya oo keliya

Guddida Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Wasiir-dawlaha Cadaalada **Md. Khaadar Axmed Diiriye** in Xila Madaxweynuhu u magacaabay loo ansixiyo.

28/06/2017 waxay gudida cadaaladu Safar kor Meer ugu bexeen xabsiyada gobolada

23rd April 2017 Kulankan gudidu la yeelatay Taliyaha Asluubta JSL Sareeye **Guuto, Maxamed Cismaan Ibraahim (xudhuun)** ayaa Waxay ka Wada Hadleen Arimaha Jeelasha halkaas oo uu Taliyaha iyo saraakiil ku wahelinayay, war bixin dheer ka siiyeen gudidda Xaalada ay marayaan jeelasha wadanku iyo waxyaaba loo baahan yahay in laga qabto.

intaa ka dib gudoomiye ku-xigeenka Gudida **Mudane Xassan Muuse Hufane** ugu mahad celiyay taliyaha sida wanaagsan ee ay u soo ajiibeen codsigii gudida, waxaanu intaa ku daray in wada shaqaynta halkaa ka sii wadi doonaan wixii ka gudi ahaan ay ka qabaan karaana ay diyaar u yihiin.



06/05/2017 Waxay Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo X. Insaanka ee Golaha Wakiiladu kulan la yeelatay **Ahmed Yuusuf Xuseen** oo ka socday Compad, Mawliid oo ka socday HRC iyo ZamZam X. Adan oo ka socotay Somaliland Hope charity organization.

Kulankan oo uu gudoominayay gudoomiyaha Gudidda **mudane Siciid Cilmi Rooble** ayaa Waxay ka wada hadleen waxaa ka mid ahaa sidii wax looga qaban lahaa tacadiga ku xadgudubka Xuquuqal insaanka iyo tacadiyada ka dhanka ah xuquuqda aadamaha iyo sidii gudida iyo hay'adaha ka shaqeeya xuquuqal insaanku iskugu xidhmi lahaayeen uma wada shaqayn lahaayeen.

kulan oo ka dhacay Xafiiska Gudiddu ku leedahay golaha Wakiiladda ayaa ku soo gebogeboobay is afgarad iyo sii wadista iyo xoojinta hawlaha Xuquuqal iinsaanka ee ay ku hawlan yihiin, guddiduna waxay uraradan u balan qaaday inay sida ugu dhaw ula shaqayn doonto iyadoo wakiil ka ah golaha Wakiiladda JSL.

Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Wasiirka Wasaarada Qorsheynta **Md. Maxamed Ibraahim Aadam (qayo-tire)** si Xila Madaxweynuhu u magacaabay loo ansixiyo.

Gudidda Arrimaha Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Wasiiru Dawlaha Wasaarada Gaashaandhiga **Md. Mustafe Faarax Abraar** si Xila Madaxweynuhu u magacaabay loo ansixiyo.

Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 33^{aad} Golaha uga soo tallo-bixisay Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Hawlaha Guud **Md. Liibaan Yuusuf Cismaan** si Xila Madaxweynuhu u magacaabay loo ansixiyo.

Muddo kordhin Golaha Guurtidu Ku Doorashooyinka Dalka:-

Golaha Guurtidu waxay 06/03/2017kii Fadhi ay yeesheen Mudo Kordhin ku sameeyeen Doorashooyinkii Madaxtooyada, Golaha Wakiiladda iyo Golayaasha Deegaanka Dalka, Mudo kordhintaas oo timi ka dib markii Madaxweynuhu Guurtida u soo gudbiyay Warqada xambaarsan laba arrimood oo kala ah:-

1. Doorashadii Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladda oo ku beegnaa 28/03/2017 inay dhacdo aanay wakhtigoodii ku qabsoomayn, isla markaana Doorashadii Golayaasha Deegaanka oo ku beegnaa inay dhacaan 28/11/2017 iyagun sidoo kale dib u dhac ku imanayo.
2. Is-afgaradka Saddex Xisbi Siyaasi ay ka gaadheen in Doorashada Madaxweynaha lagu qabto bisha October 2017 isla markaana Doorashooyinka Golaha Wakiiladda iyo Golayaasha Deegaanka dib loo dhigo mudo intaas ka badan.

Hadaba, Golaha Guurtida uu gudanaya Waajibaadkiisa Dastuuriga ee xaqa uu ugu siiyay mudo kordhinta Doorashooyinka hadii dib u dhac ku yimaado wakhtiyadooda, waxay Golaha Guurtidu fadhi ka qabsoomay Xarunta Golahaas 06 March 2017 ay muddo kordhin ugu sameeyay Madaxtooyada, Golaha Wakiiladda iyo Golayaasha Deegaanka, Muddo kordhintaas ayaa waxay ahayd.

- In la kala qaado Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladda oo ay qorshaysnayd in mar lawada qabto 28/03/2017.

- In Doorashadada Madaxtooyada oo ku beegnayd inay qabsoonto 28/03/2017 la qabto 11/12/2017 oo dib loo dhigo mudo 9 bilood iyo 27 maalmood ah.



- In Doorashada Golaha Wakiiladda iyo Doorashada Golayaasha Deegaanka la mideeyo isla markaana la qabto 28/04/2019 isku mar halkii ay ka kala dhici lahaayeen Golaha Wakiiladda oo dhici lahayd 28/03/2017 iyo Golayaasha Deegaanka oo dhici lahaa 28/11/2017, taas oo micneheedu tahay in Doorashadii Golaha Wakiiladda la kordhiyay mudo laba sanadood ah, halka Doorashadii Golayaasha Deegaanka la kordhiyay sanad iyo shan bilood.

Guddi Hawleedyada Goluhu Saaray (Ad hoc Committees):-

Intii lagu jiray Sanadkii 2017kii saddexdii Kal-fadhi ee Golewaynuhu yeeshay wuxuu sida caadadda ah guddiyo gaar ah (Ad hoc committees) u saaray inay ka soo shaqeeyaan ka dibna Golaha dib ugu soo celiyaan, Guddiyadii gaarka ahayd ee la saaray waxay kala ahaayeen:-

- **12/05/2017** Gudiddii gaar ahayd (Ad hoc Committee) ee loo saaray inay kala soo shaqeeyaan Xeer-hoosaadka Baarlamaanka (labada Gole ee Guurtida iyo Wakiiladda) guddi guurtiduna u saartay, labadaad guddi ee labada aqal saareen waxay ka soo shaqaynayaan Xeer-hoosaadka Baarlamaanku yeelanayo oo labada gole ku wada shaqayn doonaan.

Dib u-eegis lagu sameeyay Qorshihii Hiigsiga ee 2013-2016:-

Wuxuu Goluhu Sanadkii 2013kii Sameystay Hiigsi Qorshe uu hiigsanayo saddex sano oo ka bilaabmayay 2013kii ilaa 2016kii, qorshahaas Hiigsiga wuxuu Goluhu ugu talo-galey inuu horumar ka sameeyo qeybaha kala duwan ee Golaha mudadaas, waxaana ansixiyay Qorshahaas Golaha.

Qorshahaas Hiigsiga dhamaadey sanadkii ina soo dhaafey, waxaa Golaha u qorsheysan inuu sameeyo qorshe shan sano (five years Strategic Plan), hadaba, Waxaa ka hor intaan la galin dejinta iyo diyaarinta Qorshahaas shanta sano ee soo socda, waxaa qiimeyn iyo dib u eegis lagu sameeyay strategic plankii hore ee saddex sano ahaa oo dhamaadey, waxaana kulan laba maalmaado qaatey lagu qabtay Hotel Maansoor taariikhdu markay ahedy 1-2 March 2017 waxaana kulankaas isugu yimi Xildhibaanada Golaha ka Tirsan, Xoghayaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha Golaha iyo La-taliyayaasha, waxaana dib u eegis iyo qiimeyn lagu sameeyay waxyaabihii ka qabsoomey qorshahaas hore iyo wixii aan la qaban ee ku qorsheysnaa.



Sidoo kale, waxaa Magaalo Madaxda Gobolka Tog-dheer lagu qabtey kulan kaas oo kale ah oo hormood ka ahaayeen La-taliyaasha iyo Golaha iyo dhowr Agaasime Waaxeed, waxayna kulan la yeeshen isuduwayaasha Wasaaradaha/Hay'addaha Dawlada ee Gobolkaas iyo Xildhibaanada Golayaasha Deegaanka ka tirsan.



Ugu dambeyntiina si loo soo gabogabeeyo qiimeyntaas iyo dib u-eegista lagu sameynayay qorshahaas hiigsiga saddexdii sano ee ina soo dhaafey oo dhamaadey, waxaa kulan kama dambeysa ah oo lagu soo ururinayay waxyaabihii ka soo baxay labadii kulan ee hore lagu qabte Hoolka Shirarka ee Golaha kaas oo goob joog ka ahaayeen xubnihii labadii kulan ee hore ka soo qeybqaatey waxaana halkaa ku soo bandhigay natiijadii ka soo baxday ee wixii ka qabsoomey iyo wixii aan la gaadhin ee ku jirey strategic plankii hore halkaa ku soo bandhigay Gudida Farsamo ee hormoodka ka aheyd hawshaas oo ka mid ahaa **Mubaarik Faarax Warsame** La-taliyaha Siyaasada, **Siciid Faarax Xaashi** La-taliyaha Mashaariicda, **C/naasir Cismaan Maxamuud** Agaasimaha Waaxda Qorsheynta iyo **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladda Md. C/risaq Siciid Ayaanle**, waxaana halkaa ka soo baxay in 75% boqolkiiba la gaadhey waxyaabihii ku qorsheysnaa Hiigsiga Qorshahaas 2013-2016kii ee dhamaadey.

20-21 December 2017 ayay Kulan hawleed ku saabsan dib u eegista wejiga 2aad ee qorshaha 5ta sano ee 2018 ilaa 2022 ee golaha Wakiiladda yeesheen Guddida adeega Golaha Wakiiladda (Business Committee). Gudida adeega Golaha Wakiiladda ayaa ah Gudoomiyayaasha 10ka gudoomiye Gudi-hoosaad, 3da shirgudoonka golaha ah iyo Xoghayaha guud ee Golaha Wakiiladda JSL. Kulankaas Muhiimka ahaa ayaa waxa furay Gudoomiyaha Golaha Wakiiladda Mudane Baashe Maxamed Faarax waxaanu u faahfaahiyey Gudoomiyayaasha gudiyada shaqada kulan hawleedkan lagu lafo guri doono iyo sida hadda xaalada goluhu ku sugan tahay hay'addaha la shaqeeya iyo waxyaabaha la doonayo in qorshe hawleedkan lagu lafo guro.



Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane Cabdirisaaq Siciid Ayaanle ayaa mudanayaasha u faahfaahiyey ilaa hadda shaqada la qabtay iyo qabyo qoraalka Qorshaha Golaha Wakiiladda ee 5ta sano oo ay wada jir u soo diyaariyeen Waaxda Qorshaynta Lataliyaaaysha golaha iyo xoghayaha Guud.

Waxaana faaqidaad iyo xog iswaydaarsi lagu Xoojiyey waxna lagaga bedelay qorshahaas isla markaana lagu dhegeystay shaqooyinka ay gudiyadu hayaan iyo sida ay uga goan tahay in hawlahaas dhamaantood loo fuliyo waqtiyada loo qorsheeyey. Kulankaasna waxa lagu soo gebagebeeyey dhamaystirka qorshahaas oo Goluhu dhawaan ansixin doono haddii ilaahay qadaro.

Horumarinta iyo Dar-dargalinta Hawlaha Shaqo ee Maammulka Golaha:-

➤ **Laybareeriga Casriya aadna u qalabaysan oo la hirgaliyay.**

06/02/2017 Waxay Labada Gudoomiye ee labada Aqal Baarlamaan Md. Saleeban Maxamuud Aadam iyo C/raxman Maxamed C/laahi Cirro waxay si rasmiya u fureen oo xadhiga ka jareen dhisme Cusub oo Laybareeri Casri ah oo qalabaysan ah kaas oo labada Gole wadaagaan, dhismahaas oo ka kooban laba dabaq ayaa ah mid ka dhexeeya laba aqal waxaana loogu tala-galay laba qaybood oo kala ah Laybareeri wata Hoolkii Buugaagta iyo xafiisyo dhowr ah iyo Maqaaxi (cafeteria) u adeegi doona Mudanayaasha iyo hawl-wadeenada Baarlamaanka Somaliland.

Dhismaha Laybareerigan ayaa Waxaa Baarlamaanka ka caawiyay Hay'adda AWEPA, halka qalabayntiisana ay ka caawisay Hay'adda UNDP, wuxuuna laybareerigaas Mudanayaasha ka caawin doonaa cilmi-baadhista iyo xogaha ay u baahdaan iyadoo hay'adda UNDP ay keentay Dhismahaas Buugaag aad u qiimo badan oo ka kooban dhamaan qaybaha kala duwan ee Mudanayaashu baahi u qabi karaan akhriskooda iyo inay xog iyo cilmiba ka helaan.

➤ **Sare U Qaadista Amniga iyo Nidaamka Asluubta (Protocol) ee Baarlamaanka**

Iyadoo aynu ka wada dharagsanahay amni darada iyo dhibaaatooyinka ka taagan guud ahaan caalamka gaar ahaana mandaqadan aynu ku noolnahay ee Geeska Africa, wuxuu Shir-gudoonka Golaha Wakiiladdu marwalba ahmiyada koowaad siinayaa badbaadinta iyo ilaalinta amniga xildhibanaada iyo shaqaalaha golaha baarlamaanka, haddaba si loo helo xafiisyo sugan oo leh amni buuxa kuna haboon goob shaqo oo ka fog cabsi iyo ambi daro, wuxuu golaha Wakiilladu kor u qaadid ku sameeyey amniga golaha ka dib markii deyrka golaha lagu sameeyey mid xafidan, oo kor loo qaadey lana dheereeyey laguna

wareejiyey silig iyo kaabado shub ah. Waxaa kale oo golaha loo sameeyey qol yar oo lagu baadho cidkasta oo golaha galeysa (screening room) kaasi oo ay ku rakiban yihiin qalabkii muhiimka ahaa ee lagula soconayay qofka sita waxyaabaha ka mamnuuca ah in golaha lala galo sida, hubka fudud ee ay kamidka yihiin baastoolad, toori IWM.

Isagoo ahmiyad gaar ah goluhu siinaya ambiga, waxaa qaybta amniga golaha u sameeyey waax dhan oo layidhaa waaxda amniga iyo baratakoolka ee golaha, oo uga masuul ah golaha qaybtan lehna shaqaale aqoon leh qabana tababaro.

➤ **Kulamadii Gudidda Adeegyada (Business Committee).**

Shirgudoonka Cusub ee Golaha wakiiladu dhawaan doortay ayaa bilowgii Furitaanka kal-fadhigii 35aad waxa uu kulamo gaar gaar ah la yeeshay Gudoomiyayaasha gudiyada, iyo agaasime waaxeedyada golaha Wakiiladda oo uu hor kacayo Xoghayaha guud ee Golaha Wakiiladda. Xoghayaha Guud ee Golaha ayaa si joogto ah oo todobaadle ah u hawlgeliyey Agaasime Waaxeedyada iyo lataliyayaasha golaha, kulamadan ayaa bar bilow looga dhigay isla qjaanqadka iyo socodsiinta hawlaha golahani qaranka u hayo.

27 November 2017 ayay kulan Gaarka ah Shir-gudoonku la yeeshay Gudoomiyayaasha 10-ka Gudi ee Goluhu leeyahay, kulankan ayay ujeedadiisu ahayd dar-dar gelinta hawlaha shaqo ee golaha horyaala iyo sidii kor loogu qaadi lahaa shaqooyinka ay gudiyadu gacanta ku hayaan.

Gudoomiyayaasha gudiyada, shirgudoonka iyo Xoghayaha guud ayaa sida xeer hoosaadka goluhu dhigayo waxa laysku yidhaahda Guddida adeega Golaha (Business Committee) waxaanay shaqadoodu tahay hogaaminta iyo hawlfududaynta shaqada guud ahaan gole weynuhu u xil saaran yahay.

Waxaana Gudoomiyayaasha gudiyada shir gudoonku faray inay kor u qaadaan shaqooyinkooda isla markaana ay gole weynaha u soo gudbiyaan xeerarka ay gacanta ku hayaan si waajibkiisa goluhu uga guto. Sidoo kale waxa Kulan gaar ah Agaasimayaasha Waaxaha la yeeshay Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiiladda Mudane Axmed-Yaasiin sh. Ali Ayaanle kulankan oo oo Xoghayaha guud goob joog ka ahaa isaguna soo qaban qaabiyey ayuu gudoomiye Ayaanle warbixino shaqadooda ku saabsan kaga dhegeystay Agaasime waaxeedyada.

Ugu danbayna waxa uu gudoomiyuhu ku amaanay sida wanaagsan ee ay shaqadooda u gudanayaan isagoo ku wargeliyey in loo diyaar garoobo shaqo badan iyo isla xisaabtan joogto ah si ay inooga soo baxaan midho iyo maxsuul magic iyo maamuusba inoo sameeya Gole ahaan iyo ka qaran ahaanba

➤ **Bandhiga Buugta iyo Wax Akhriska ee (Hargiesa Book Fair) oo Golaha Wakiiladu ka qayb-galay.**

Waxaa Dalka ka dhacday oo lagu qabtay **23 july 2017** bandhiga Buugaagta iyo Wax akhriska, (Hargiesa Book Fair 2017) bandhigaas oo ahaa markii 10 ee lagu qabto Dalka sanadkiiba mar, waxaa sanadka lagu soo bandhigay Buug aad u fara badan iyadoo ay ka soo qaybgaleen qorayaal maxaliya iyo kuwo ajaanib ah, waxay socotay mudo 7 caano maal ah waxaana halkaa lagu soo bandhigay bug kumanaan koru dhaafay oo qoreen qorayaasha Soomaliyeed iyo kuwo ajaanib ahiba.

Waxaa Sanadkan markii ugu horeysay ka qaygalay Bandhigaas Buugta Golaha Wakiiladda Somaliland wuxuuna halkaas ku soo bandhigay buugaag kala duwan kuwaas dadweynuhu aad ugu riyaaqeen inta wax akhriska iyo inay Dawladnimada wax ka bartaan jecelna aad uga heleen, waxa Buugtaas isugu jirtay Buug ka hadlaysa sida Golaha Wakiiladu ama Xeer-dejinta Somaliland u shaqeyso, wax qabadii Golaha Wakiiladda lagu soo doortay Doorashadii 2005tii, Buug ka kooban 4 Buug oo ku qoran yihiin doodihi Golaha Wakiiladu yeeshay, Dastuurka Somaliland oo loo soo daabacay qaab cusub oo dadweynaha u fududaynaya inay akhristaan kaas ah laga soo dhigay buug jeebadeed (pocket Book) iyo sidoo kale Buug ka hadlaya Cilmi-baadhis lagu sameeyay Dadweynuhu siday u arkaan Golihii ay doorteen 2005kii.



Buugaagtaas tiradoodu kor u dhaaftay tobanka Buug waxaa aad u soo dhoweeyay Maamulka Hay'adda Somaliland Book Fair taas oo wax badan ku soo kor dhisay Bandhiga iyadoo aanay dadku hore uga heli jirin Buug ka hadlaya Dawlada iyo siday u shaqeyso ama ka hadlaya nidaamka Dawaladeed iyo wixii Somaliland u soo qabsoomay, sidoo kale Dadweynaha ayaa aad halka uga guranayay Buugtaas oo aad xiiso gaar ah ugu qabeen sida Dastuurka Somaliland oo dadku aanay hore u heli jirin waliba isagoo yar u sahlaya inay jeebkooda ku qaataan, sidoo kale ajaanib badan oo ka soo qaybgalay bandhiga buug badana ka iibsanaayay markii ay arkeen Buugta Golaha Wakiiladu keenay waxay ka qaadanayeen halkii buugba dhowr nuqul waxaana aad uga muuqatay wajiyadooda xiisaha ay hayaan buugtaas.

Ugu dambeyntii ka qaybgalka Bandhiga Buugta iyo Akhriska Somaliland ee Golaha Wakiiladda waxay ka dhigtay mid xiiso gaar ah yeeshay bandhiga waxayna taasi sii dhiirigalinaysaa in Sanadkasta sidaas oo kale Golaha Wakiiladu dadweynaha ugu soo bandhigo shaqadiisa, wixii u qabsoomay iyo qaabka dawladu u shaqayso oo dadku wax badan ka aqoon. Sidoo kale waxay Golaha u noqotay mid wax badan ka badashay fikirkiid dadwaynaha Somaliland ka haysteen Golihii ay shacabkani soo doortay waxayna wax badan ka barten ama ka ogaadeen xaqiiqda dhabta ah ee Golaha Wakiiladda ka jirta.

Wufuudihii Caalamiga ahaa ee Golaha yimi:-

12/12/2017 waxaa Golaha lagu soo dhoweeyay Wafti ka socday Dalalka Yurub iyo Hay'addaha qaadhaan-bixiyayaasha ah ee Golaha Wakiiladda la shaqeeya, waftiga oo kulan saacado qaatay la yeeshay Shir-gudoonka Golaha, Xoghahaya Guud, La-taliyayaasha Mashaariicda iyo Siyaasada iyo Agaasimaha Waaxda Qorsheynta, waxaa kulankaas si weyn laysula soo qaaday sidii kor loogu qaadi lahaa wadashaqaynta iyo kaalmaynta Baarlaamanka somaliland taas oo ay aakhirkiina isku afgarteen shirgudoonka iyo weftigaasi.

Shir-gudoonka iyo Waftidu waxay aad uga wada-hadleen waxyaabaha Golaha u qorshaysan ee ay ka mid tahay dhamaystirka Qorshaha Hiigsiga 2017-2022 oo Goluhu ku shaqayn doono shantaas sano iyo doorarka ay ku yeelanayaan Hay'addaha iyo Dalalka ay waftiga qaadhaan-bixiyayaashu ka socdeen.



Waftigan ayaa wuxuu dalka u yimi ka qayb qaadashada Xaflada caleemo saarka iyo dhaarinta Madaxweynaha cusub ee Somaliland dhawaan loo doortay waxayna ka mid ahaayeen Wufuudo heer caalami iyo heer Gobol oo Dalka u yimi ama lagu casuumay Caleema saarka Madaxweynaha Cusub ee ku guuleystay Doorashadii dalka ka dhacday 13 November.



Mudane ka geeriyooday Golaha iyo Kuwii iscasilay:-

No.	Mudanayaashii geeriyooday AHN	Taariikdii	Mudanayaashii badalay
1.	Md. Xamse Maxamed Gaadweyne	17/07/2917	C/laahi Ismaaciil Faarax
2.	Md. C/raxman Maxamed Talyanle	26/09/2017	Md. Dr. Max'ed Ax'ed Abdi (Carabeyto)
3.	Md. Xasan Cawaale Caynaan	21/10/2017	Md. Xasan Xuseen Shide

Waxa sidoo kale Golaha iska casilay Gudoomiyihii Golaha Wakiiladda **Md. C/raxman Maxamed C/laahi (Cirro)** oo ka dib markii uu xilka Gudoomiye iska casilay mudo bil ka dib ah sidoo kale baneeyay Xubinimadii Golaha Wakiiladda, waxa isna Golaha iska Casilay **Md. Saleebaan Yuusuf Cali Koore** oo noqday Wasiirka Biyaha Xukuumada uu Madaxweynaha Cusub Md. Muuse Biixi soo dhisay, Hadaba labada Mudane ee Xubinimada baneeyay iyo kuwa soo badalay waa:-

No.	Mudanayaashii is-casiley	Mudanayaashii badalay
1.	Md. C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)	Md. Maxamed Jaamac Cabdi (Gaaxnuug)
2.	Md. Saleebaan Yuusuf Cali (Koore)	Md. Axmed Maxamed Caateye

Appendix

Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiiladda:-

No	Magacayada Xildhibaanka	Gobolka/Degmadda
1.	<i>Gud. Md. Baashe Maxamed Faarax</i>	G. Sool, Degmada L/canood
2.	<i>Gud. Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle</i>	G. Awdal, Degmada Boorama
3.	<i>Gud. Md. Dr. Cali Yuusuf Axmed</i>	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
4.	Md. Abokor C/raxmaan Good	G. Awdal, Degmada Borame
5.	Md. Dr. Axmed Cabdi Nuur (Kijaandhe)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
6.	Md. Axmed Ducaale Bulaale	G. Sool, Degmada Ceynabo
7.	Md. Axmed Max'ed Diiriye (Nacnac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
8.	Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhari)	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
9.	Md. C/raxmaan Yuusuf Cartan	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
10.	Md. Cali Max'ed Aadan (Calibarre)	G. Sanaag, Degmada Xiingalool
11.	Md. Max'ed Baaruud Shide(Qamac)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
12.	Md. Max'ed Cismaan Max'ed (Bulqaas)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
13.	Md. Cumar Axmed Saleebaan(Sanweyne)	G. Tog-dheer, Degmada Burco
14.	Md. C/laahi Ismaciil Faarax	G. Tog-dheer, Degmada Burco
15.	Md. Ibraahim Axmed Haybe Sh. Muuse	G. M/jeex, Degmada Gabiley
16.	Md. Ibraahim Axmed Reygal	G. Sool, Degmada Ceynabo
17.	Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
18.	Md. Siciid cilmi Rooble	G. Saaxil, Degmada Berbera
19.	Md. Max'ed X.Yusuf Axmed (Wabeyo)	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
20.	Md. Max'ed X.Max'uud Cumar Xaashi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
21.	Md. Max'ed Xuseen Xaaji Ciise	G. Saaxil, Degmada Berbera
22.	Md. Max'ed Jamac Cabdi	G. Sool, Degmada L/canood
23.	Md. Max'ed Cali Xirsi	G. Tog-dheer, Degmada Burco
24.	Md. Prof. Max'ed Cumar Aadan Jiir	G. Tog-dheer, Degmada Burco
25.	Md. Mahdi Xuseen Cadar	G. Awdal, Degmada Borame
26.	Md. Max'uud Axmed Obsiye	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
27.	Md. Aadan Xaaji Diiriye Dirir	G. Saaxil, Degmada Berbera
28.	Md. Aadan Muxumed Hoori (Matan)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
29.	Md. Axmed Barkhad Obsiye	G. Awdal, Degmada Borame
30.	Md. Axmed Xasan Adan (Weysa cade)	G. Saaxil, Degmada Berbera
31.	Md. Axmed Max'ed Nuur	G. Tog-dheer, Degmada Oodweyne
32.	Md. Baar Siciid Xaaji Faarax	G. Sanaag, Demada Dhahar
33.	Md. C/raxman Muuse Jamac	G. Sool, Degmada L/canood
34.	Md. C/casiis Ismaaciil Ducaale	G. Tog-dheer, Degmada Burco
35.	Md. C/kariim Aw Cali Shabeel	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
36.	Md. C/qaadir X. Ismaciil jirde	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
37.	Md. C/qaadir Jamac Xamuud	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
38.	Md. C/raxmaan Max'ed Jamac (A-xoog)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
39.	Md. Cali Obsiye Diiriye (Cali Gebiley)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
40.	Md. Cali X. Max'ed Muuse	G. Tog-dheer, Degmada Burco
41.	Md. Cali Sh. Ibraahim Aareeye	G. Awdal, Degmada Seylac
42.	Md. Farxan Max'ed Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
43.	Md. Xasan Xuseen Shide	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
44.	Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf	G. Tog-dheer, Degmada Burco
45.	Md. Maxamed Jaamac Cabdi (Gaaxnuug)	G. Saaxil, Degmada Berbera

46.	Md. Max'ed Axmed Max'ed (Dhakool)	G. Sool, Degmada L/canood
47.	Md. Max'uud Dhunkaal Guutaale	G. Sool, Degmada Ceynabo
48.	Md. Axmed Maxamed Caateeye	G. Sool, Degmada L/canood
49.	Md. Max'ed Saalax Cige	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
50.	Md. Max'uud Jaamac X.Cilmi (Dable)	G. Saaxil, Degmada Berbera
51.	Md. Siciid Cartan Cisman	G. Saaxil, Degmada Berbera
52.	Md. Cabdi Maxmed Jaamac (Gaagaale)	G. Awdal, Degmada Borame
53.	Md. Bashiir Sh.Xuseen Tukaale	G. M/jeex, Degmada Gabiley
54.	Md. C/qaadir Askar Xasan	G. Sool, Degmada Ceynabo
55.	Md. C/raxmaan Cismaan Caalin	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
56.	Md. Xaashi Xuseen Caabi	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
57.	Md. Faraax Max'uud Cabdulle	G. Saaxil, Degmada Berbera
58.	Md. Jaamac Xasan Aadan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
59.	Md. Mahdi C/laahi Max'uud	G. Awdal, Degmada Borame
60.	Md. Ibraahim Mahdi Buubaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
61.	Md. Xuseen Maxamed Cige	G. Tog-dheer, Degmada Burco
62.	Md. Max'ed Faarax Qabile	G. Saaxil, Degmada Berbera
63.	Md. Max'ed Jamac Cali	G. Tog-dheer, Degmada Burco
64.	Md. Muuse Max'ed Ismacil (Hoos u jeed)	G. Awdal, Degmada Borame
65.	Md. Naasir X. Cali Shire	G. Tog-dheer, Degmada Burco
66.	Md. Siciid Maxamed Cilmi	G. Sool, Degmada L/canood
67.	Md. Ibraahim Caraale Cabdi	G. Sanaag, Demada Ceel-afweyn
68.	Md. Dr. Maxamed Axmed Cabdi (Carabayto)	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
69.	Md. C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	G. Awdal, Degmada Borame
70.	Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacky)	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
71.	Md. Siciid Warsame Ismaaciil	G. Sool, Demada Ceynabo
72.	Md. Wali Axmed Xaawo	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
73.	Md. Axmed Faarax Jooj	G. Sanaag, Demada Ceergaabo
74.	Md. C/qaadir Jibril Tukaale	G. Awdal, Degmada Borame
75.	Md. Cabdi Hiirad Warbaa Faahiye	G. Sool, Degmada L/caanood
76.	Md. Maxam'ud J. Warfaa	G. M/jeex, Degmada Hargeysa
77.	Md. Xasan Muuse Hufane	G. Awdal, Degmada Borame
78.	Md. Xaamud Cisman Cigaal	G. Saaxil, Degmada Berbera
79.	Md. C/raxman Maxamed Jaamac	G. Awdal, Degmada Borame
80.	Md. Ismaaciil Maxamed Xasan	G. Tog-dheer, Degmada Burco
81.	Md. Axmed Cabdi Kaahin	G. Awdal, Degmada Borame
82.	Md. Yuusuf Liibaan Cumar	G. Sanaag, Demada Ceergaabo

Liis-ka Magacyada Shaqaalada Golaha Wakiillada

No.	Magac	Shaqada/Xilka
1.	Abdirisak Sa'ed Ayanle	Xoghayaha Guud ee Golaha
2.	Jamal Jama Hassan	Xoghaye ku-xigeenka Golaha
3.	Abdi Ismcil Xawadle	Agaasimaha Waaxda Maamulka iyo Xisaabaadka
4.	Awad Ali Mohamed	Agaasimaha Waaxda Hadal-qoraalka, Golewaynaha iyo Gudiyada
5.	Mahamuud Sulamen Omer	Agaasimaha Waaxda ITga iyo Cilmi-baadhista
6.	Abdinasir Osman Mahamoud	Agaasimaha Waaxda Qorsheynta
7.	Hibo Mohamed Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Xusuus-dhowrka
8.	Ismahan Yusuf Ibrahim	Agaasimaha Waaxda Shaqaalaha
9.	Ahmed Mohamed Eige	Agaasimaha Waaxda Hab-maamuuska iyo Amniga
10.	Sulieman Abdisitar Dubad	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Dadweynaha iyo Warbaahinta
11.	Yusuf Habib Husein	Agaasimaha Waaxda Laybareeriga
12.	Faysal Ibrahim Esse	Agaasimaha Waaxda Xidhiidhka Gobolada
13.	Hamse Mohamoud X. Muuse	Agaasimaha Xafiiska Miisaaniyada
14.	Mustafe Mohamed X. Dahir	La-taliyaha Sharciga
15.	Mubarik Farah Warsame	La-talyaha Siyaasda (Policy Advisor)
16.	Sa'ed Farah Hashi	La-taliyaha Mashaariicda
17.	Mohamed Abdirahman Ducale	La-taliyaha Luuqadaha
18.	Abdirahman Hirad Jamac	La-taliyaha Sharciga (Legal Adiver)
19.	A/risaq Muse Idle	La-taliye
20.	Ahmed Ali Kahin	La-taliyaha Sharciga
21.	Huda Mohamed Ahmed	Madaxa Xafiiska Xoghayaha Guud iyo Madax-qaybedka Gudiyada
22.	Abdillahi Abdi Adan	Madax-qeybedka Hadal-qoraalka iyo Xoghaynta Gudida Cadalada
23.	A/Rahman Jama Nur	Madax-qeybedka Warbahinta iyo Xoghaynta Gudida A. Gudaha
24.	Farah Ibrahim Gamute	Madax Xisaabaadka (Head of Accountant)
25.	Mohamed Sa'eed Husein	Madax-qeybeedka Ilbsiga
26.	Asiya Rashiid Egge	Madax qaybeedka Shaqaalaha
27.	Aydarus Ega Khayre	Madaxa Daabacaadaha
28.	Sa'ed Jirde Haybe	Muuqaal qaade (Camera Man)
29.	Mahad Omer Sa'eed	Madax-qeybeedka Golewaynaha iyo Xoghaynta Gudidda I&DHQ
30.	Seaad Yasin Ismcil	Madax-qeybeedka Waaxda Xusuus Dhowrka.
31.	Khadra Hussein Jama	Madax-qeybeedka Waaxda Shaqaalaha
32.	Mustafe Mohamed Hassan	Madax-qeybeedka Cilmi Baadhista
33.	Wacaysa Ali Ahmed	Madax-qeybeedka Qorsheynta
34.	Ali Axmed Ibrahim	Xoghaynta Gudidda Sirdoonka iyo Amniga
35.	Ayanle Ahmed Abdi	Xoghaynta Gudidda Joogtada iyo Anshaxa
36.	Ridwan Abdillahi Abdi	Xoghaynta Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicga
37.	Maxamed Yusuf Ayanle	Xoghaynta Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
38.	Bade Cali Habane	Xoghaynta Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka
39.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xoghaynta Gudidda Arrimaha Didabada
40.	Sahal Guled Xadi	Xoghaynta Gudidda Arrimaha Bulshada
41.	Amal Ahmed Iman	Xoghaynta Xafiiska Xuus-dhowrka
42.	Mohamed Mohamud Osman	Xafiiska Waaxda Qorsheynta
43.	Hodan Adam Siciid	Ururinta iyo habeynta Xeerarka iyo Xogtooda
44.	Khadra Suber Nux	Xoghayn Xiiska Xoghayaha Guud
45.	Abdirkarim Muse Ibraahim	Xoghayn
46.	Abdiaziz Nur Ali	Madax-qeybeedka Hab-maamuuska

47.	Mustafe Nur Farah	Xoghayn
48.	Mohamed Hussein Eilmi	Xoghayn
49.	Saado Abdillahi Abdi	Xoghayn Xafiiska Hadal-qoraalka
50.	Warsame Bashe Farah	Xoghayn
51.	Fadxiya Cali Xasan	Xoghayn
52.	Hamse Nux Ahmed	Xoghayn
53.	Mohamed Hassan Mohamed	Kamarad Duube
54.	Ahmed Osman Farah	Xoghayn
55.	Dheg Adan Bile	Xirfadle dabka iyo Electronika
56.	Nasra Mawliiid Cabdi	Xoghayn
57.	Guled Ahmed Jama	Xirfadle
58.	Shukri Ahmed Abdillahi	Xoghayn
59.	Ali Mohamed Hussein	Xoghayn
60.	Omer Mohamed Aden	Xoghayn
61.	Deeq Ali Aareeye	Xoghayn
62.	A/qani Mustafe Hassan	Xoghayn
63.	Ahmed Farah Bodhle	Xoghayn
64.	Sidiiq Mux'ed Axmed	Dareewal
65.	Siciid Cabdi Warsame	Dareewal
66.	Abdi Mahamoud Abdillahi	Dareewal
67.	Mohamed Hassan Diriye	Dareewal
68.	Fu'ad Omer Bare	Dareewal
69.	Mohamed Qasin	Dareewal
70.	Mohamed Muse Hassan	Washman
71.	Xasan Cali Jibril	Beer-fale
72.	Fosiya Osman Aw-Ali	Nadiifiso
73.	Safi Siyad Aw-Abdi	Nadiifiso
74.	Sahra Muse Hassan	Nadiifiso
75.	Fosiya Mahamoud Osaman	Nadiifiso
76.	Farhan Hise Mohamed	Nadiifiso
77.	Fahima Ahmed Guled	Nadiifiso
78.	Koos Ahmed Nur	Nadiifiso
79.	Hinda Abdi Ismail	Nadiifiso
80.	Miski Muhumed Jamac	Nadiifiso
81.	Sulekha Ali Hassan	Nadiifiso
82.	Fadumo Hassan Ismail	Nadiifiso
83.	Safiya Ahmed Mohamed	Nadiifiso
84.	Saynab A/rahman Mohamed	Nadiifiso
85.	Saynab Kosar Husein	Nadiifiso
86.	Samda Suleyman Warsame	Nadiifiso
87.	Sulekha Yusuf Ismail	Nadiifiso
88.	Shamis Mohamed Muse	Nadiifiso
89.	Yasmin Mohamed Hassan	Nadiifiso
90.	Hodan Ibrahim Abdillahi	Nadiifiso
91.	Fardus Mohamed Hassan	Nadiifiso
92.	Aasiya Maxamed Aw-Cali	Nadiifiso
93.	Ibrahim Sa'eed Ayanle	Madaxa Xafiiska Gobolka Tog-dheer
94.	A/wahab Ahmed Mohamed	Xafiiska Gobolka Tog-dheer
95.	Ilhaan Abdi Warsame	Xoghaynta Xafiiska Gobolka Tog-dheer
96.	Mahamoud Mohamed Omer	Madaxa Xafiiska Gobolka Sanaag

97.	Mohamed Ali Yusuf	Xafiiska Gobolka Saanag
98.	A/rahman Mohamed Yusuf	Madaxa Xafiiska Gobolka Saaxil
99.	A/karim Omer Jama	Madaxa Xafiiska Gobolka Awdal
100.	Abdillahi Nur Farah	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Awdal
101.	Muxiyadiin C/raxmaan Muuse	Madaxa Xafiiska Gobolka Sool
102.	Mohamed A/Dahir Jama	Madaxa xigeenka Xafiiska Gobolka Sool
103.	Sa'eed Abdule Gafane	Washman
104.	Mohamed Abdi Hussein	Washman
105.	Bare Mohamed Hassan	Washman
106.	Ali Abdi Dalmar	Washman
107.	A/fatah Yusuf H.Ali	Washman
108.	Fosiya Osman Abdillahi	Nadiifiso
109.	Saynab Jama Hirad	Nadiifiso
110.	Deqa H. Mohamed Ibrahim	Nadiifiso
111.	Fadumo Sa'eed Eilmi	Nadiifiso
112.	Halimo Mohamoud Mohamed	Nadiifiso